
# Maclumaad ku saabsan nidaamka magangalyodoonka

Somali

Infobus für Flüchtlinge



Ein Gemeinschaftsprojekt von

MFR Münchner Flüchtlingsrat

AMNESTY INTERNATIONAL

Landeshauptstadt München Kulturreferat

Wahl des Migrationsbeirates am 22. Januar 2017

UNO-Flüchtlingshilfe

## Ku soo dhowoow Jarmalka

Buug/Hage wuxu fikrada ugu horeyso kaa siin doona nidaamka magangalyodoonka ee Jarmalka. Buugan ama Hageha aad ayuu u yaryaay, taas oo ujeeddada ay tahay inaad borsadaada ama jeebka jacketkaaga ku qaadan karto.

Su'aalaha qaar waad ka dhex helidoonta jawaabahooda. Ujeeddada lakinse waxay tahay markaad aqrisato hagaha inaad macluumad ka hesho ama fahanto cidda ama jihada kale oo aad la xiriiri kartid kaagana jawaabi kara su'aalaha kale oo aad iswaydiin doonto.Waxaan ku leennahay nasiib wanaagsan! Annaga oo ah shaqaalaha Infobus ee München.

Kala xiriir:

infobus@amnesty-muenchen.de

Info-Bus c/o amnesty international, Volkartstr. 76, 80636 München

www.muenchner-fluechtlingsrat.de/infobus Mobil: +49 176/67606378

**Wakhtiga ama xilliyada shaqada** :



Isniin 14:00-15:30 Unterhaching, Biberger Str. 88
Isniin 16:00-18:00 Mc Graw Kaserne, Tegernseer Landstr. 239a
Talaado 17:00-19:00 Funkkaserne, Frankfurter Ring 200
Arbaco 17:00-18:30 Bayernkaserne ka hor guriga 18 (la SOLWODI), Heidemannstr. 50
Arbaco 18:30-20:00 Bayernkaserne ka hor guriga 45, Heidemannstr. 60
Sabti 11:00-13:00 Am Moosfeld 37
(Bisha June 2016, xilikasta ka eeg ama fiiri Bogga Infobus ee internetka saacadaha la

**Xogta macluumadka aad ka heli karto magaalada München**

| | |
|---|---|
| **Su'aalaha ku saabsan nidaamka magagalyadoonka** Kooxda Macluumadka wareego (Infobus) | Macluumaadka magangalyodoon ee baraha qaabilaada ee München Tel. +49 176/67606378 infobus@amnesty-muenchen.de |
| Xafiiska Amensty qaybta maganlayodoonka | Volkartstr. 76. 80636 München (Leonrodplatz) , Arbaco 19:00-20:00 fiidnimo |
| Rechtshilfe für Ausländerinnen ama la taalin dhinaca qaanunka | EineWeltHaus, Schwanthalerstraße.80, 80336 München (U4/5 Theresienwiese agteeda), Talaado 18:00-20:00 fiidnimo, qoritaanka wuxu bilaaban 17:15 galabnimo |
| **La talin haween** JADWIGA | Schwanthalerstraße 79, 80336 München Telefoonka +49 89/38534455 Email: muenchen@jadwiga-online.de |
| SOLWODI | Dachauer Str. 50 80335 München Telefoonka +49 89/27275859 Email: muenchen@solwodi.de |
| **La talin codsiga magangalyodoonka** Arrival Aid | Email: info@arrivalaid.org www.arrivalaid.org |

**Latalinta Sharciyeed oo lacag la’aan ah lagama helo Jarmalka, laakinse waxaad macluumaad ka heli kartaa meelaha halkan ku qoran adiga oo aan wax lacag ah bixin.**

## Cinwaanno muhim ah

| |
|---|
| **Xarunta qaabilaada ee qaxootiga ee ugu horeyso (AZ)**<br>Maria-Probst-Straße 14, 80939 München |
| **Xafiiska Socdaalka Federaalka ee aqoonsiga qaxootiga ajnabiga ah (BAMF)**<br>Boschetsriederstraße 41, 81379 München |
| **Xafiisyada adeegayaasha bulshada ee Innere Mission ee xarumaha qaabilaadda (EAE)**<br>**Bayernkaserne**, Haus 58, Heidemannstr. 60, 80939 München<br>**Dependance Funkkaserne,** Frankfurter Ring 200, 80807 München<br>**Dependance McGraw Kaserne,** Tegernseer Landstr. 239a, 81539 München<br>**Depandance Moosfeld,** Am Moosfeld 37, 81829 München |
| Xafiiska qaabilsan musaafurinta ama celiska<br>**Coming Home**<br>Franziskanerstraße 6-8<br>81669 München<br>**La talin wadamada Afrika, koonfurta America** Tel. +49 89/233-40780<br>**La talin wadamada Asia** Tel. +49 89/233-40708<br>**La talin wadamada Bariga Yurub**Tel. +49 89/233-40617 **La talin wadamada Koonfurta Yurub iyo Ciraaq** Tel. +49 89/233-40776 |

## Xafiisyada qaabilsan codsiga magangalyodoonka

**Dowlada Bavariyada Sare (ROB )**
- Xafiiska koowaad ee Diwaangelinta magangalyodoonka (qaybta **EASY**)
- Xafiiska wuxuu kugu qorayaa mesha aad degi lahayd

**Xafiiska Socdaalka Federaalka ee aqoonsiga qaxootiga ajnabiga ah (BAMF ee München „Boschetsriederstraße“)**
- Wuxuu kaa dhageysanayaa sababaha aad u raadinaysid magangalyadoonka (dhagaysi)
- Wuxuu go'aan ka gaarayaa codsigaaga magangalyadoon
- Wuxuu caddeeynayaa in aad ku noqotid dalka Yurub ee aad marka horeba aad ka soo degtay ama ka soo gashay iyo in kale
- Waa xafiis maamulka bulshada, maaha maxkamad.

**Qeybta dadka shisheeye ee magaalada ama Degmada (ABH = KVR, in München „Poccistraße“)**
-Waxay bixisaa warqadaha aqoonsiga haddii aad sii degganaaneysid Munich iyo/ama haddii laguu aqoonsado qaxooti
- Waxey amri kartaa boliska si laguu xiro haddii ay tahay inaad Jarmalka ka baxdid

**Maxkamada Maamulka (VG, in München: „Bayerstraße“)**
-Waxeey heshaa rafcaanka aad ka qaadatay diidmada magangalyadaada, waxayna ka gaaraysa go'aan

**Codsiga magangalyodoonka**

**1. Cidda ama xafiiska aad ka dalban karto magangalyo**

Waxaad iska diiwaangelisa xarunta imaashada ee Ankunftszentrum ee München, waxay ku taal Maria-Probst-Str. 14. Saldhigga Boliska waad u gudbin kartaa codsigaaga , waxaa suurta gal ah inay dacwo kugu furanto madaama aad Jarmalka si sharcidarro ku soo gashay. Waxaa lagaa doonayaa inaad dhiibto warqadaha ama caddayn aqoonsi.

*Inta aadan u gudbinin warqadahaaga Madaxda/Masuuliyiinta ka reebo nuqullo gal ku xafido ayaga iyo waraaqahaaga/ dokumentigaaga kale.*

***2.*** **Xarunta qaabilaadda ee qaxootiga ee ugu horeyso : Waxaa lagu siinayaa warqad aqoonsi iyo baaris caafimad** Waxaa lagu siinaya warqad aqoonsi ku meel gaar ah. Warqaddan waxay caddeynaysa inaad magangalyo dalbatay. Farahaaga iyo sawirkaaga waxaa lagu xafidayaa hab electronic ah.

**3. Waxaa laguu beddela barta qaabilaadda (EASY)** Inta aad joogto xarunta qaabilaadda ee ugu horeyso waxaa la fiirinayaa barta qaabilaadda oo masuul kaa ah. Taas waxay ku xerantahay wadanka aad ka timid. Waxaa suurta gal ah in ay noqoto barta mid gobol kale oo Jarmalka ku taal (Nidaamka EASY)

**Xaqa wadajirka qoyska:** Haddii aay qaraabo ku joogto Jarmalka ama qaraabo aad Jarmalka isla timaadeen, la socodsi saraakiisha. Waxaad waydiin karta dowlada hoose inay kuu oggolaato inaad meel u dhow qaraabadaada aad ugu noolaatid. Cafimaad darro haddii ay jirto ama mashaakil kale haddii u jiro la socdsi xafiiskaaga bulshada (Sozialdienst)

4. **Xarunta qaabiladda EAE:** Ugu yaraan waxaad joogeysa halkaas ilaa 6 bilood. Xarunta haddii ay ku taallo München waxaa lagu siinayaa kaar loo yaqan (yellow paper). Waxaa ku yaala balamo

muhim ah, sida balanta caafimadka iyo mida xafiiska codsiga magangalyodoonka.

**5. Baarista caafimadka ee xaafiska caafimadka ee cudurrada faafa** Baaristan waxaa la suubinaya maalamaha ugu horeyso oo aad wadanka soo gaarto. Baristan caafimad marka ugu horeyso waxay tahay in la ogaado inaad qabto cudurrada laysqaadsiiyo. Marka lagu baaro waxaa lagaa saarayaa Raajo (X-ray) xabadka ama feeraha, waxaa la baarayaa dhiigga oo dhiig ayaa lagaa qaadayaa. Waxaad helaysaa warqadda jawaabta barista caafimaad haddii aad xanuunsan tahay oo keliya.

*Haddii aad la ildaran tahay dhibaato caafimaad ee aan lagaa baarin adiga qaad talaabo oo sheeg. Waxaad la xiriirtaa adeegayaasha bulshada iyo dhaqtiirta*

**6. Codsiga Magangalyodoonka ee BAMF** (waxaa laguu soo dirayaa warqad ay ballanta ku qoran tahay ama waxaa lagugu qoraa warqada yellow paper): Xafiiska BAMF ayaad ka codsan karta magangalyada. Xafiiskan ayaa ka shaqeynayo dalabkaaga Waxaa lagaa qaadaya faro. **BAMF**ta waxay kaa baaraysaa liisaska/diiwaannada dalalka kale ee Yurub EURODAC.

**7. Su'aalo ku saabsan sida (dariiqa) aad ku timid Jarmalka** (su'aashan waxay la socotaa tan Nr.6) Malintaas waxaa lagu waydiinayaa sida aad ku timid Jarmalka. BAMFta waxay rabtaa inay ogaato haddii dal kale ee Yurub ah aad tagtay, inaad magangelyo codsatay amaba aad ku soo safartay dalkugal/fiiso dal kale ee Yurub.

**Digniin**: Haddii aad dalkale ee Yurub ah aad gashay intaadan Jarmalka iman dalkaasina lagaa diiwaangelshay . BAMFta waxay baari doontaa haddii dib lagugu celinayo waddankaas iyo haddii kale . Haddii ay jiraan sababo laguugu celin karin waddankas sida caafimad darro ama waxyaabo kale la socodsi saraakiisha.

**8. Su'aalaha ku saabsan sida aad ku timid oo xafiska ZRS** (dadka dhan lama weydiiyo su'aalahan)

**9. Warqadda loo yaqan „Aufenthaltsgestattung“ ayuu xafiiska BAMF**ta **(Green Paper)**

Waxaa lagu siinayaa warqada kor ku xusan. Warqaddan waa aqoonsi ama dokument aad isticmaali doontid inta codsigaaga magangalyodoonka socdo. Waxaa lagaa doonayaa warqadaan markasto inaad ka soo cusboonayso xafiiska dowlada hoose ee ajnabiga.

**10. Beddelka deegaanka** 6 bilood kaddib waxaa laguugu qoraaya waxa loo yaqaan „Transfer“, waxaa laguu beddelaa deegaan kale oo ku yaal gobolkan Bayern.

**11. Wareysiga BAMFta ee codsigaaga magangalyodoonka:** Warqad ayaa laguu soo dirayaa waqtiga uu wareysiga noqon doono, waxaa suurta gal ah in wareysigan u dhaco beddelka hoygaaga cusub ka hor ): waa muhiim (fiiri bogga 12)

12. **Wareysigii BAMFta oo qoraal ah ayaa laguu soo diraaya**

**13. Jawaabta codsiga magangalyodoonka**

**14. Haddi aad racfaan rabto inaad qaadato** (fiiri bogga 16/17)

**Muhim:** Haddii aad dalkale ee Yurub ah aad gashay intaadan Jarmalka iman dalkaasina lagaa diiwaangelshay. BAMFta waxay baari doonta in dib lagugu celinayo wadankaas iyo in kale. Haddii ay jiraan sababo lagugu celin karin waddankas sida caafimad darro ama waxyaabo kale, la socodsi saraakiisha.→ Fahfaahinta ka fiiri bogga 10

Magangalyodoonka ka yimaado waddamadan (Bosnien, Albania, Kosovo, Montenegro, Mazedonia, Herzegowina, Serbia, Senegal, Ghana) waxaa la dajin doonaa xeryo qaabilaad oo dadka noocas ah khas u ah, dadkani codsiyadooda si deg deg ah ayaa looga shaqeyn doonaa. Haddii waddamada kor ku xusan aad ka soo jeeddo, si deg deg ah u raadso talooyin ku saabsan sharciga magangalyodoonka.

## Nidaamka Sharciga Magangalyadoonka

**Kudhawaad 6 Bil**

**Imaashaha Jarmalka**
- Diwaangelin
- Baaris caafimad
- Waxaa lagu gudbina xeradda dagnaashada
  - Codsi magangalyadoon iyo su'aalo ku saabsan Dublin oo **BAMF** ay ku waydiin doonto

Hadi aad fara leedah ay → Oo go'aanka Dublin haduu noqdo musaafurin → Waxaa laguu celina waddanki oo aad marki hore ka soo gashay

Go'aanka Dublin laguguma fulin ama waa la joojiyay → Bilo ilaa sanado

**Bilo ilaa sanado**

**Wareysi BAFMta**
- Su'aalo ku saabsan warqadaha aqoonsiga
- Su'aalo ku saabsan sababaha ad wadankaaga uga soo tagtay
- Warqadaha aqoonsiga maalinkas uu dhiib **BAMF**

**Toddobaadyo ilaa bilo**

**Wareysigi oo qoraal ah ayaa lagu soo diraa**
- Waxaa lagaa doonayaa inaad iska aqriso oo haday qaladaad ku jiraan saxdo, **BAMF**ta u dir waxyaabaha oo aad saxday

**Bilo**

**Go'aanka Magangalyo ee BAMF**

- Haddii codsigaaga magangalyo si caadi ah la diido sida "waxaan sal lahayn"→ 2 toddobaad godahooda rafcaan waa ka qaadan karta
- Haddii codsigaaga magangalyadoon la diido sida "dabcan waxaan sal lahayn" → 1 toddobad godahiisa rafcaan waa ka qaadan karta

Ogolaasho magangalyo siyaasadeed

→ Sharciga waxaa ka qaadanaysaa xafiiska Ausländerbehörde

**2 Sanad gudahooda**


**Rafcaanka ee maxkamada Maamulka (VG)**
- Maxkamada waxay ka gaari doonta go'aan mar labaad codsigaaga magangalyo, iyado sal uu u yahay go'aanka wareysigi BAMF
- Garyaqaan inaad qabsato qasab maaha, lakin mararka qaar waa muhim

**Nidaamka sharciga ee Dublin**
Kaddib markaad ka codsato magangalyo xafiiska **BAMF,** Hadda BAMFta waxay kaa baaraysaa liisaska/diiwaannada dalalka kale ee Yurub, EURODAC. Ma dhici kartaa inaad dal kale ee Yurub ah aad tagtay, inaad magangelyo codsatay laguuna diiday? Amaba aad ku soo safartay dalkugal/fiiso dal kale ee Yurub ah amaba aad dalkaas si sharcidarro ah ku soo gashay? Haddii aay arrinta sidaan tahay dalkale ee Yurub ah ayaa arrimahaaga magangalyadoon ka masuul ah. Haddii aad dalkale ee Yurub ah aad gashay intaadan Jarmalka iman dalkaasina lagaa diiwaangelshay dib ayaa laguugu celinayaa.
**Haddi aad wadan kale ka timid, si deg deg ah u raadso talooyin dhinaca sharciga magangalyodoonka**

**Waxyaabo muhiim ah uu ku sharraxayo sawirka hoos ku yaallo:**
- Haddii aad racfaan qaadato, 6 bilood oo lagugu celin karo waddanka aad ka timid waa la tirtirayaa ama markii go'aanka racfaanka yimaaddo ayey horey u bilaabanaysa 6 bilood
- Haddi aad dhuumato/isqariso 6 bilood waxay isku badalaysaa 18 bil.
- Haddi wadanka kale aad codsi magangalyodoon aad ka dalbatay, waqtiga lagugu celin doono wuu ka duwan yahay kan kor lagu xusay.

Sawirka hoos ku yaallo wuxuu si fudud kuu fahansiinayaa nidaamka sharciga ee Dublin marka uu qofka codsan magangalyo. Faahfaahin haddaad u baahan tahay la xiriir xafiisyada talooyinka magangalyadoonka laga helo.

**Nidaamka sharciga ee Dublin**



**Wareysiga ee BAMF** (fiiri qeybta 12)
Waxaad ka helaysaa **BAMF**ta ballan qoraal ah ee taariikhda iyo waqtiga dhageysigaaga ama wareysigaaga. Haddii aadan ku imaan karin waqtiga ballanta (bilmatal waad xanuunsan tahay) waa inaad soo wargelisaa BAMFta marka hore kaddibna soo dir warqad caafimaad. Haddii adan sidaan yeelin waxay caqabad ku noqonaysaa marxaladdaada magangalyadoon, sababta oo ah waxa loo qaadanayaa inaad si ula kac ah aad u dayacday waajibkaagi wada shaqeynta..
Wareysiga waa xilliga ugu muhiimsan marxaladda magangalyadoonka, waa **halka** iyo fursaddaada **keliya** ee aad ku fasiri kartid tahriibki iyo tan ugu muhiimsan oo qaxaagi ah sababti aad u soo qaxday. Waxa aad ku sheegtid wareysiga waxay saldhig u noqonaysaa wax walba. Waxaa laguu oggol yahay inaad soo wadato qof aad aaminsan tahay, qofkaas oo maalinka wareysiga kula joogi karo. Waxaa lagaa doonayaa inaad BAMFta u sii sheegto inuu qof ku soo raacayo waqti dheer ka hor ballantaada.

**Wareysiga ka hor**

- Isku sii diyaari su'aalaha ku saabsan sababaha kugu kallifay inaad dalkaaga ka soo cararto, taasi waxay kuu sahlaysaa inaad su'aalaha wareysiga si sahlan uga jawaabi karto.
- Hadday jirto xaalad caafimaad darro, ama jirro loo dhiman karo oo halis ah waa inaad u sheegtid wareysiga qofka kaa qaadayo. Hadday taas jirto waxaa u baahan tahay dhaqtar oo kuu qoro warqad caafimaad darro o ay ka muuqato dibaatada aad qabto, warqaddaas markaad hesho waa muhim inaad u dirto xafiiska BAMFta. Sidoo kale la xiriir xafiisyada talooyinka magangalyodoonka laga helo.
- Dhagaysiga magangalyadoon waxaad xaq u leedahay turjubaan afkaaga hooyo iyo af kale ee labaad oo aad si fiican u fahmaysid. Waxaad soo wadan kartaa qof aad ku kalsoon tahay, lakin waa inaad BAMFta horey ula sii socodsiisa inta la gaarin ballantaada wareysiga.

• Codsadayaasha haweenka ah waxay ku adkaysan karaan in loo keeno turjubaan/afnaqe haween ah iyo in qofka su'aalaha weydiinaya ama la doodaya inuu noqdo qof haween ah.

**Intuu socdo wareysiga**

- Marka ugu horeysa, waxaa lagu weydiinayaa inaad fahmi kartid tarjubaanka iyo in adigane lagu fahmi karo . Haddi aad isfahmaynin qofka wax kuu tarjumaya la socdsii qofka wareysiga kaa qaadayo, waxaad xaq u leedahay in aad dalbato tarjubaan kale. Waxaa jira tarjubaan oo shaqadooda si wanaagsan u qaban karin. Waxaa suurta gal ah in wareysiga gadaal u dhaco si laguugu helo tarjubaan fiican.
- Kaddib qofka wareysiga kaa qaadayo wuxuu rabi doonaa in uu ogaado inaad dabcan nabad qabtid oo aad diyaar u tahay dhegaysiga. Kaddib asaga/ayada waxay ku warsan inaad fahamtay wax allaale iyo wixii la xiriira nidaamka wareeysiga. Waxba ha dareemin cabsi xataa haddii uu turjubaanka u dhaqmo sida qof welwelsan. Waa dhegeysigaaga **waana xaqqaaga**.
- Ka jawaab su'aalaha kaddib markaad si fiican u fahanto!

-Si faahfahsan uga bixi sharraxaad dhibaatooyinka kaa soo gaaray wadaankaaga, xitaa haddi uu ku waydiin weydiiyaha.
- U dhiib saraakiisha warqadaha aqoonsiga sida dokumetiga, sawiro iyo haday jiraan qoraallo joornal, oo caddeeymo ah.
- Haddi ay jiraan waxyaabo muhim u ah codsigaaga oo lakin xanuun badan ama laga xishoonayo waa inaad sheegtaa , muhim wuxuu u yahay codsigaaga magangalyadoonka.

Haddii dhibaatooyinka aad sharraxaysid ay kugu adkaato inaad sharraxdo, u sheeg qofka ku wareysanayo inaadan ka hadli karin maadaama ay dhacdoyin aad u xanuun badan ay yihiin.
- Wareysiga dhan waa la duubi doonaa markaas kaddib iyadoo qoraal ah ayaa laguu soo dirayaa iyadoo af jarmalka ku qoran. Qofka tarjumaanka ah wuxu kuugu soo celinayaa markale waxkasto

aad ku hadashay. Iska ilaali haddi aad wax qalad laguu aqriyo inaad islamarki iska saxdo. Qoraalka wareysigaaga wuxu noqon doona waxa sal u noqon doono jawaabta BAMFta ama haddii ay noqoto inaad racfaan qaadato, maxkamadda taas ayey isticmaali doontaa.

**Wareysiga/dhageysiga**

| | |
|---|---|
| **24 Su'aal waxay la xiriiraan aqoonsigaaga, qoyskaaga iyo sidi aad halkan ku timid** | -Su'aalaha ku saabsan aqoonsigaaga waa kuwo gaagaaban.<br>→ si toos ah uga jawaab |
| **Habka ama jidka aad soo martay** | - Sharrax jidka aad soo martay.<br>-- waxaa surta gal ah inaad su'aalahan horey uga jawaabtay<br>-→ lakin uga jawaab sida dhabta ah mar kale, waa muhim inuu hadalkaada is waafaqo, waayo jawaabahaaga waa la baarayaa |
| -**Sababaha shaqsiga ah ee dalkaagakaa uga soo tagtay** | → Ku sharrax hadalladaada sida ugu cad laguna qanci karo sababihi iyo dhacdooyinki kugu kellifay inaad dalkaaga ka soo tagtid. Sharraxaaddaada waxay saldhig u tahay go'aanka aay **BAMF**ta ka gaarayso in laguu aqoonsado qaxooti iyo in kale |
| **Caqabadaha kaa hortaagan inaad dib u noqotid** | → Ku sharrax/faahfaaxi hadalladaada sababaha aad dalkaaga ugu laaban karin iyo dhibka ku soo gaari kara shaqsi ahaan haddii ay taas dhacdo. Sharraxaadaas/faahfaahintaas waxay saldhig u noqonaysa inay BAMFta ay ku masaafurin hadday ku qancaan hadalladaada |

| |
|---|
| **Muxuu ku salaysanyahay go'aanka BAMFta?**<br>Weydiiyaha wuxuu rabaa inuu ku qanco in waxkasto oo aad sheegtay in ay run yihiin ka hor inta aanu ka gaarin go'aan arrintaada. Haddii, sida inta badan magangalyadoonka, aadan keeni karin wax caddeeymo ah weydiiyaha waa in uu adiga iyo ereyadaada cuskado suurtagalna aay u noqotaa in uu shaqsi ahaan ku rumaystaa |
| **Cabbirka go'aanka magangalyadoon**<br>-Magangalyo waxaa lagu siin karaa haddii ay jiraan sababo lagugu ugaarsan karo, sida sinjigaaga/qabiilkaaga, diintaada, jinsiyaddaada, koox bulsho, ama afkaartaada siyaasadeed.<br>-Waa sharciyan dalkasto in lagugu magangeliyo haddii ay **noloshaada , xuriyadaada**, iyo **karamaada oo qofka baniaadamka** si loo ilaaliyo. |

**Muhim u ah wareysiga**

- Turjubaanka wuxuu meesha u joogaa si ay suurtagal kuugu noqoto in lagu fahmo. Laakinse qofka aad la hadlaysid waa weydiiyaha, ee maaaha turjubaanka
- Waa ku asluub xumo dhaqanka Jarmalka inaad fiirin marka aad qofka la hadlaysid, waxaa loo qaadan karaa islaweyni iyo inaad been sheegaysid
- Jarmalka waxan wax kasta uga hadalnaa si toos ah oo saraaxad leh furfurnaan. Haddii aad waxa aad ka hadlaysid aad ka leexleexatid, waxaa laguu qaadanayaa qof aan isku kalsooneen oo isku dayaayo inuu waxyabo qariyo. Waxaad lumin kartaa in lagu rumaysto.
- Haddii u isfahmi waa dhaco ama haddii su'aalo hadda ka hor aad ka jawabtay qalad loo fahmay, sharraxaad ka bixi, si aad u saxdo qaladkaas
- Waxaa lagaa dalbanayaa wareysiga aakhirkiisa inaad saxiixdo warqad, waa muhim inaad fahantay intaadan saxiixin, iyo in wax kasto muhim ah lagu qorey wareysiga

**Wareysiga kaddib**

**- Wareysigaaga oo qoral ah** (qeybta 13)**:** Qoraalka tifatiran ee dhageysiga waxaa laguugu soo dirayaa afka Jarmalka maalmo ama toddobaad kaddib dhegaysigaaga. Sida ugu dhaqsida badan halaguugu turjumo. Waxaad u diri kartaa sixidda qoraallada BAMFta kana codsan kartaa in laguu tixgeliyo

**- Go’aanka magangalyo ee BAMF** (qeybta 14)**:**
Fiiri oo hubi waxa ay **BAMF**ta xaqiiqadi ka tiri iyo doodda ay ka bixisay aqoonsiga amaba diidmada codsigaaga magangalyadoon. Waxaad rafcaan kaga qaadan kartaa go’aanka **BAMF**ta maxkamadda maamulka caddaaladda ee **VG**.
Tiriska waqtiga kama dambeysta ah ee rafcaanka wuxuu ka bilaabmayaa maalinta ogeysiiska go’aanka **BAMF**ta laguu soo diro. Waa muhim inaad warqadda go'aanka inaad xafiddo, baqshada/galka xataa hayso, waayo taariqda ku qoran ayaa muhim u ah tiriska waqtiga oo racfaankaaga muhim u ah.

**Go'aanka BAMF**ta**: Sharciyada kala duwan ee magangalyadoonka**

| **Go'aanka** | **Cawaaqibta** |
|---|---|
| 1. Aqoonsiga qaxoti ee siyaasadeed sida ku cad<br>(Art. 16a Abs. 1 GG)1 | - 3 sano sharci iyo basaboor bluug ah<br>-waxaa codsan kartaa in qoyskaaga laguu keeno (codsiga 3 bil goodahooda ku suubi) |
| 2. Aqoonsiga qaxotiga ee Geneve convention (§ 3 Abs. 1 AsylG) | - xuquuqdaada waxay la mid tahay sida aqoonsiga qaxootiga→ kor ka fiiri |

| | |
|---|---|
| 3. Farac Magangalyo loogu talagalay dadka aan loo aqoonsan qaxootinimo (§ 4 Abs. 1 AsylG) | - sharci sanad ah, kaddib waxaa lagu siinayaa 3 sanadood<br>- ilaa 16.03.2018 lama oggola inaad qoyskaaga keento<br>-waxaad haysataa 2 toddobaad si aad rafcaan ku qaadatid iyo inaad ku dalbatid in lagu siiyo aqoonsiga qaxootiga ama sharciga hakinta musaafurinta |
| 4. Hakinta fulinta in dib laguu celsho amaba lagu masafuriyo (§ 60 Abs. 5 oder 7 Aufenth) | -sharci sanad ah, kaddib waxaa lagu siinayaa 3 sannandood.Waxaad haysataa 2 toddobaad si aad rafcaan ku qaadatid iyo inaad ku dalbatid in lagu siiyo aqoonsiga qaxootiga ama hakinta musaafurinta |
| 5. Diidmada codsiga magangalyodoonka sida **unbegründet**; maaha sharciga hakinta musaafirinta | -Codsigaaga magangalyodoonka waa la diiday<br>-Waxaad haysataa **2 toddobaad** si aad rafcaan ku qaadatid iyo inaad ku dalbatid in lagu **daafaco qaxooti ahaan** amaba ugu yaraan codso in **la hakiyo fulinta in dib laguu celsho amaba lagu masafuriyo** |
| 6. Diidmada codsiga magangalyodoonka sida **offensichtlich unbegründet** (§ 30 AsyG);<br>maaha sharciga hakinta musaafurinta | -Codsigaaga waa la diiday,<br>-Waxaad haysataa 2 toddobaad si aad rafcaan ku qaadatid iyo inaad ku dalbatid in lagu daafaco qaxooti ahaan (§ 60 1 AufenthG)<br>amaba ugu yaraan codso in la hakiyo fulinta in dib laguu celsho amaba lagu masafurshiyo |

| | |
|---|---|
| 7. Dalkale ee Yurub ah ayaa arrimahaaga magangalyadoon ka masuul ah go'aanka **Dublin** | -Waxaad haysataa 1 toddobad inaad rafcaan ka qaadato ama dalbato in la hakiyo musaafirinta |

Racfaankaga ku socdo **VG**da, waxaad u baahan tahay inaad la timaadid fasiraad tifatiran sababta ay aragtidaada qalad kuula tahay diidmada codsigaaga magangalyadoon. Cudurdaar u yeel aragtidaada adiga oo sida ugu suurtagalsan u tixraacaya sababaha **BAMF**ta ay ku xustay ogeysiiska diidmada. Latalin sharciyeed iyo, garyaqaan waxay noqonayaan kaalmo weyn marxaladdaan.

**Kaddib marki la diido codsigaaga magangalyodoonka**

Codsiga magangalyadoonka waa la diiday.Taas macnaheeda waxay tahay wax laga qaban karo ma jiro. Qoraal ayaa laguu soo diraaya oo lagu amrayo inaad waddanka Jarmalka ka baxdo muddo kooban gudaheeda. Iyado lagu qasbin keliga waad ka bixi kartaa Jarmalka. Waddanka aad ku laabanayso qasab maaha inuu noqdo waddankaaga. Waa inaad macluumaad ka raadsatid xarunta la talinta oo qaxootiga amaba aad heshid garyaqaan wakiil kaa ah. Go'aanka kaligaa ha gaarin. Haddi aad Jarmalka keligaa ka bixin, waxaa imaanayso in lagu musaafuriyo.

**Haddi qoraalka noocas ah kuu yimaado, si deg deg ah waa inaad macluumaad ka raadsatid xarunta la talinta qaxootiga amaba aad heshid garyaqaan wakiil kaa ah.**

**Wadamada kale ee Yurub**

Aadidda waddan kale ee Yurub ku yaalo kaddib marki laguu diido sharciga magangalyadoonka Jarmalka wax kuuma kordhinaayso. Nidaamka sharciga ee Dublin wuxu leeyahay: Wadanka Yurub ee kuugu horeyay ayaa ka masuul ah codsigaaga magangalyadoonka.Hadday arrinta ay sidaan

tahay, Jarmalka masuul kama noqon karo codsigaaga magangalyadoonka.

Haddii aad go'aansatay inaad wadankaaga u laabatid, la xiriir xafiisyada la talinta arrimaha maasaafurinta ka shaqeeyo ee gobolkaaga ku yaal, cinwaanka ka fiiri hoos

| | |
|---|---|
| Xafiiska la talinta dib u noqoshada ee Südbayern<br>Telefon: +49 821/5089632,<br>a.werner@zrb-suedbayern.de<br>Lange Gasse 4, 86152 Augsburg | Xafiiska la talinta dib u noqoshada ee Westbayern<br>Telefon: +49 931/38666782<br>Franziskanergasse 3 , 97070 Würzburg<br>info@zrb-westbayern.de |
| Xafiiska la talinta dib u noqoshada ee Nordbayern<br>Marienstraße 23, 90402 Nürnberg<br>Tel.: +49 911/2352222<br>E-Mail: info@zrb-nordbayern.de | Xafiiska la talinta dib u noqoshada ee München<br>Franziskanerstraße 6-8, 81669 München<br>reintegration@muenchen.de<br>Tel: +49 89/233-40708 |

**Su'aalo muhim ah**

**Xaggee la ii oggol yahay inaan ku noolaado**

3 bilood ugu horeyso codsiga magangalyodoonka iyo waqtiga aad ku nooshahay Xarunta Qaabilaada EAE, waxaa laguu oggol yahay inaad magaalada lagugu qorey inaadan ka bixin. Markaas kaddib waa laguu oggol yahay magaaloyin kale inaad u safarto. Ka dalbo xaafiska kaa masuul ah ee „Dowladda Hoose Ajaanibta“ inay sharcigaaga ama „Aufenthaltsgestattung“ ay kuugu qoran inaad ku qasbaneen 1 magaalo kaliya inaad joogtid.

**Xaqiiji in warqadaha ka imaanaya Dowladda lagugu soo diro cinwaanka aad deggantahay!**
Toddobaadyada iyo bilaha ugu horreya inta aad ku jirtid marxaladda magangalyadoon, waxaa lagu dejinayaa Xarunta Qaabilaadda **EAE**. Warqadaha Boostada ka yimadda madaxda (sida ballannada dhegaysiga, ogeysiisyada) waxaa lagugu soo dirayaa Xarunta qaabilaadda. **Maalin walba fiiri** boorka ogeysiisyada isla markiina soo qaado warqadahaaga. Haddii aadan sidaas yeelin waxaad aqrinaysaa go'aanno muhiim ah waqti dambe waxadna halis u tahay inaad dib uga dhacdid waqtigi lagaa rabay inaad ka jawaabtid. Lagaama aqbalaayo marmarsiiyo; tani waxaa loo qaadanayaa ballandarro dhinacaaga ah.
Haddii aad u guurtid meel kale ee München amaba meel kale inta aad ku jirtid marxaladda magangalyadoon, waa inaad wargelisid **BAMF**ta adiga shaqsi ahaan siisid cinwaankaaga cusub. Waxaa surtagal ah in ay jiraan qodobbo ka duwan kuwi hore si laguu soo gaarsiyo waraaqaha kuu socdo/Boostadaada. Xaqiiji inaad shuruucdaas taqaanid!

**Markastaba wado waraaqahaaga degganashada tan ugu dambaysa!**
Haddii Boliska ay ku baaraan aadna caddayn kariwaydid cidda aad tahay waxaad geli kartaa mixnad adag (ganaax fal dembiyeed, xarig).

**Inta aadan u gudbinin warqadahaaga Madaxda/Masuuliyiinta, ka reebo nuqullo gal ku xafido ayaga iyo waraaqahaaga/ dokumentigaaga kale. Dokumentiga waa muhim waddanka Jarmalka, waa in meel lagu xafidaa**

**Xuquuqda iyo waajibaadka dhanka nidaamka magangalyadoon**
**Xuquuqdaada**

• Marxaladda magangalyo (iyo inta racfaanka), lama oggola in lagugu amro ama lagugu qasbo inaad la xiriirtid safaaradda ma qunsuliyadda dalkaaga hooyo si aad uga heshid basaboor kale. Haddii aad sidaasi sameysidna waxaa dhumaya/lumaya fursadda codsigaaga magangalyadoon, waayo waxaad geleysaa magangalyada dalkaaga hooyo.

• **BAMF**ta waxay leedahay doodayaal/weydiyeyaal u gaar ah oo xirfado gaar ah leh, loona carbiyey si aay su'aalo u weydiiyaan qaxootiga oo baahi gaar ah u qaba in la badbaadiyo. Haddii ay jiraan xanuun ama mushkilado kale oo kula soo gudboonaadey la socodsii intuu wareysiga bilaaban BAMFta.

• Haddii aad keligaa tahay kana yar tahay 18 sano, kuma quseeyo sharciga qaxootiga ee dadka qaangaarka ah, sidaasi darteed waxaad u baahan tahay qof sharci ahaan kaa masuul ah dhanka arrimaha magangalyadoonka. Masuulka/ilaaliyaha waxaa kuu magacaabaysa maxkamada arrimaha masuuliyadda/ilaalinta.

**WAAJIBKAAGA ISKAASHI/WADASHAQEYN**

Waxaa waajib sharci kugu ah inaad caawintid madaxda adiga oo ka jawaba su'aalaha adiga ama xubnaha qoyskaaga quseeya, tani waxay tahay waa inaad qayexdaa /caddeysaa su'aalaha. Xattaa garyaqaanka kaama fasaxi/joojin karo waajibkan.

**Waajibaadka waxay la xiriiraan gaar ahaan**

• **Caddeynta aqoonsigaaga** : waa inaad keentid shahaadooyin laga soo saaray dalkaaga hooyo

waxaa habboon ineey ku jiraan kuwa sawirkaaga uu ku dheggan yahay. Waa inaad xaqiijisid inaad haysatid nuqul codsigaaga iyo nuqul dokumentigi/warqadihi aad horey u gudbisay, meel ku qoro magaca sarkaalka iyo lambarka qolka si aad marka dambe u ogaatid halka waraaqahaaga aad u gudbisay (mararka qaar is faham la'aan ayaa ka dhexdhaco saraakiisha).

•Macluumaad iyo haddii aay la xiriirto **dokumenti safarkaaga**: dalkugal/fiso iyo shahaado caddeynaysa xuduudihi aad ka soo gudubtay, waxaa loo isticmaali karaa caddeyn aqoonsi; dukumenti oo aay ku qoran tahay taariikh (sida warqadda dayaaradda lagu raaco waxay kaa caawini kartaa si aad u caddeysid dariiqii aad soo martay iyo sababta aad u doonaysid magangalyada – Masuuliyiinta/Madaxda aad ayeey muhiim ugu yihiin dokumentiga la xiriira safarkaaga, sababta ugu muhiimsan oo ah go'aankii Dublin (fiiri bogga 9).

•Waajibka **diiwaangelin**: xaqiiji inaad wargelisid masuuliyinta haddii cinwaankaaga isbeddelo, Isbeddelka xuquuqda degaankaaga, isbeddelka la xiriira arrimaha xaaskaaga iwm.

•Waxaa wanaagsan inaad wax badan soo sheegto intaad wax aad u yar soo sheegi lahayd. Warqadaha aad u dirayso masuuliyiinta waxaa ku dirta Fax, warqada fax inuu gaaray meel ku kaydi.

## Nolosha marxaladda magangalyo

### Maxaad ku noolaan?

Waxaad codsatay magangalyo arrintaada waa ay socotaa/ waa lagu guda jiraa. Marxaladdan waxaad helaysaa nacfi isugu jira lacag iyo dhar, raashin sida uu sheegaayo sharciga Asylbewerberleistungsgesetz (AsylbLG). Xaqiiqadii, waxaad xaq u leedahay daryeel caafimaad waxaad u tegi kartaa Takhtar Guud oo ku daaweeya.

Qofka magangalyo codsaday, sharciga wuxuu u oggol yahay daryeel caafimaad oo xaddidan:

daweyn deg deg ah (aan ahayn cudur joogta ah) ee cudur iyo xanuun, iyo daryeel caafimaad oo uurka iyo dhalmada. Daryeel caafimaad oo dheeraad ah ama gargaar xanuunnada kale caadi ahaan waxaad heleysaa oo keliya warbixinta Qaybta Caafimaadka kaddib. Adeegayaasha bulshada oo ay wehliyaan "Sozialbürgerhaus" ayaa kaa caawin kara habeyntani.

**LA QABSASHADA DEGAAN**
Su'aalo bulsho iyo sharciyeed: waxaa jira dad iyo ururro badan oo kaa caawin kara sidi aad ula qabsan lahayd deegaanka Jarmalka kaalana qayb qaadanaya nolol malmeedkaaga halkan.

**Halkan u jeedi su'aalahaaga**:
Adeegayaasha bulshada iyo golayaasha macluumaadka socdaalka (Caritas, AWO, Innere Mission, Laanqayrta Cas ee Bavaria BRK)
Kuwani waa baraha ugu horreyaa ee aad u jeedin kartid su'aalaha nacfiga bulsho iyo macluumaadka ugu horreeya ee socdaalka.
Haddii aad rabtid inaad baratid afka Jarmalka amaba horumarisid xirfadahaaga, haddii aad rabtid inaad ogaatid goorta iyo sida aad xaq ugu yeelan karaysid inaad shaqeysatid iwm

**Qaabka Cinwaankaaga cusub ku wargelinaysid BAMFta iyo VG**

An das BAMF
Bundesamt für Migration und Flüchtlinge
Boschetsriederstraße 41
81379 München

Mitteilung meiner Adressänderung – AZ: ...........................

Sehr geehrte Damen und Herren,

hiermit teile ich Ihnen mit, dass ich ab sofort unter folgender Adresse erreichbar bin:
NAME Vorname
Straße:
PLZ/Ort:

Mit freundlichen Grüßen

_________________________________________
Datum / Unterschrift

Haddii aad ka qaadatay rafcaan go'aanka BAMFta ee diidmada codsigaaga magangalyadoon waa inaad wargelisaa oo kale VGda ood u sheegtaa cinwaankaaga:
An das Verwaltungsgericht München
Bayerstraße 30
80335 München

Isbeddel Cinwaan _ AZ Lambar:
Gacaliso Marwo, Gacaliye Mudane, waxaan idinku wargelinayaa in cinwaankayga uu isbedellay isla mar ahantan: Magaca qoyska, lambarka jidka, Lambarka Boostada/Degmada Daacadnimo, Taariikh/Saxiix)

Infobus für Flüchtlinge, c/o amnesty international
Volkartstr. 76, 80636 München
Mobil: +49 176/67606378
e-mail: infobus@amnesty-muenchen.de

**Wakhtiga ama xilliyada shaqada** :

**Isniin** 14:00-15:30 Unterhaching, Biberger Str. 88
**Isniin** 16:00-18:00 Mc Graw Kaserne, Tegernseer Landstr. 239a
**Talaado** 17:00-19:00 Funkkaserne, Frankfurter Ring 200
**Arbaco** 17:00-18:30 Bayernkaserne ka hor guriga 18 (la SOLWODI), Heidemannstr. 50
**Arbaco** 18:30-20:00 Bayernkaserne ka hor guriga 45, Heidemannstr. 60
**Sabti** 11:00-13:00 Am Moosfeld 37

(Bisha June 2016, xilikasta ka eeg ama fiiri Bogga Infobus ee internetka saacadaha la)

www.muenchner-fluechtlingsrat.de/infobus